

XABSI KU JIRA LAAKIIN HADDII KALE AWOODA INUU CODEEYO

MA LIHID CIWAAN JOOGTO AH? DHIB MALAHAN!

Ciwaan guri oo caadi ah looma baahna inaad isku diiwaan geliso si aad u codeyso.

Sharciga gobolka ayaa u oggolaanaaya codbixiyeyasha inay iska diiwaan geliyaan meel kasta oo uu codbixiyuhu u qadariyo inay tahay halka ay degan yihiin. Waxaa laga yaabaa inay tahay goobta ay ku qaataan wakhtigooda ugu badan, ama halka ay habeenkii seexdaan.



CIWAANKA GURIGA AYAA NOQON KARA:

- Xarunta dadka bilaa hooyga ah.
- Waddo u dhow halka aad ku nooshahay.
- Meel aad gaariga ama mootada dhigato.



CIWAANKA BOOSTADA AYAA NOQON KARA:

- Xarunta dadka bilaa hooyga ah.
- Ciwaanka saaxiibkaa ama qof qaraabo ah.
- Wakaalad adeeg.

Haddii aad dhib badan ku qabto helista warqaddaada codbixinta ee boostada la soo dhigay, waxaad qaadan kartaa warqad codbixin beddel ah oo aad ka helayso halka Xarunta Codbixinta. Goobaas ayaa laga heli karaa kingcounty.gov/elections.

Haddii aad ku jirto xabsi, weli waad is diiwaan gelin kartaa waxaadna dhiiban kartaa codkaaga haddii:

- Lagugu xukumay dambi fudud.
- Aad sugayso xukunka dambi-weyn.

SADDEX HAB OO LA ISKU DIIWAAN GELIN KARO:

- Buuxi foomka diiwaan gelinta (weydii shaqaalah waaxda asluubta).
- Oonleenka iska diiwaan geli barta VoteWa.gov.
- Nala soo xiriir si aan foomka boostada kuugu soo dirno.

DHIIBASHADA CODKAAGA:

- Warqadaha codbixinta aya boostada lagu diraa 2.5 asbuuc ka hor doorasho kasta.
- Warqadaha codbixinta waxaa loo diraa ciwaanka aad isticmaashay markii aad is gelinaysay. Nala soo xiriir haddii aad rabto in warqaddaada codbixinta loo soo diro xabsiga.
- Na soo wac haddii aadan helin warqaddaada codbixinta ama aad u baahan tahay warqad codbixin beddel ah. 206-296-8683. Waxaan aqbalnaa wicitaannada ka yimaada xabsiga.
- Shaqaalah waaxda asluubta aya sidoo kale kaa caawini kara inaad hesho warqadda codbixinta. Lama furo warqadaha boostada ee ka socda dowladda codkaaguna waa mid adiga kuu khaas ah.

SIIDAYNTA KADIB:

Marka xabsiga lagaa sii daayo, haddiiba aad u qalanto, waad codeyn kartaa. Waxaad u baahan tahay oo keliya inaad dib iskaga diiwaan geliso oonleenka, boostada, ama shakhsii ahaan. Na soo wac haddii aad u baahan tahay caawinaad ama aad qabto su'aalo.

ARDAYDA JAAMACADDA

Waxaad iska diiwaan gelin kartaa gurigaaga ama xarunta jaamacadda. Dookha adiga ayaa iska leh.

- Waxaad keliya oo aad iska diiwaan gelin kartaa hal meel.
- Ardayda ayaa badanaa adeegsada ciwaanka waalidkood ama qofka masuulka ka ah marka ay is diiwaan gelinayaan. Xaqiji inaad ka dhigto ciwaankaaga meesha aad dooneysyo in warqaddaada codbixinta lagu soo diro.
- Codbixiyaha oo keliya ayaa joojin kara ama cusbooneysiin kara diiwaankooda. Haddii aad tahay waalid aadna hesho warqaddooda codbixinta, weydii ardaygaaga inuu beddelo ciwaankisa boostada ee aan ka hayno. Warqadaha codbixinta ayaa sidoo kale la sii gudbin karaa.



QOYS XILIYEEDKA IYO SAFARLAYAASHA

Haddii aad ku nooshahay ciwaan kale qeyb ka mid ah sannadka, waxaad awooddan:

- Inaad cusbooneysiiso ciwaankaaga boostada adoo galaaya barta internetka ee VoteWA.gov.
- Inaad diiwaankaaga ku darto ciwaan xilliyeed oo leh taariikhoo gaar ah oo aad joogeyso ciwaankaas. Booqo barta internetka ee VoteWA.gov.
- Naga soo wac 206-296-VOTE (8683) ama shakhsii ahaan u imoow Waaxda Doorashooyinka intaadan bixin ka hor.

CODBIXIYEYAASHA SOCODKA KU JIRAD ➤➤

Adduunka maanta guuraaga ah, waa wax caadi ah in codbixiyeayaashu ay lahaadaan wax ka badan hal ciwaan ama aysan lahayn wax ciwaan joogto ah gebi ahaanba.

**Si kasta oo xaaladdu tahay,
Doorashooyinka Degmada King
ayaa halkan u jooga inay
caawiyaan. Waan kula shaqeyn
doonaa si aan u xaqijino inaad
hesho warqad codbixin aadna
fursad ugu hesho in codkaaga
la maqlo.**



Markaad is diiwaan geliso si aad u codeyso, waxaa lagaa doonayaa inaad bixiso laba ciwaan:



CIWAANKA GURIGA

Kani waa ciwaanka aad ku noosahay. Waxay go'aaminaysaa waxa ku qoran warqaddaada codbixinta.



CIWAANKA BOOSTADA

Kani waa ciwaanka aan ku soo diri doono warqaddaada codbixinta. Ciwaankaan ayaa noqon kara meel kasta oo ka tirsan gobolka, dalka, ama aduunka.

SIDA LA ISKU DIIWAAN GELIYO XAALAD KASTABA OO JIRTA



Iska diiwaan geli oonleenka barta VoteWA.gov. Waa inaad haysato leesanka darawalmimada ee Gobolka Washington ama aqoonsiga Gobolka Washington ee hadda.



Boostada. La soo deg oo daabac foomka diiwaan gelinta codbixiyaha oo boostada ugu dir Waaxda Doorashooyinka Degmada King.



Shakhsii ahaan. Wuxaad iska diiwaan gelin kartaa si aad u codeyso Xarunta Codbixinta ilaa iyo 8 p.m. Maalinta Doorashada.

Doorashooyinka Degmada King

919 SW Grady Way
Renton, WA 98057
kingcounty.gov/elections
206-296-VOTE (8683)
elections@kingcounty.gov

Saacadaha Shaqada

Isn'iin - Jimco
8:30 a.m. - 4:30 p.m.

Baraheena Bulshada

[@kcelections](https://www.kcelections.org)



codeyn!

CODBIXIYEYAASHA LEH CIWAANNADA AAN CAADIGA AHAYN



King County
Elections